JUMHUURIYADDA SOOMALILAND

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD, 2022

# AF-SOOMAAALI

2022

GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA

SomExams

SOM EXAMS

Wadarta guud

**Magaca** ..............................................

**Dugsiga**..............................................

**R/lambar**..............................................

## JUMHUURIYADDA SOMALILAND

## WASAARADDA WAXBARASHADAIYO SAYNISKA

## GUDDIGA IMTIXAANAADKA QARANKA
## IMTIXAANKA SHAHAADIGA AH EE FASALKA 8AAD

# AF-SOOMALI

**2021 - 2022**

**WAKHTIGA: 2 SAACADOOD**

**10 DAQIIQO OO DHEERAAD AH KU AKHRI WARAAQAHA SI AAD U HUBISO**

**TILMAAMO**

- Imtixaanku waxauu ka kooban yahay **12** waraaqood oo daabacan
- Tiri oo wergeli horjoogaha haddii ay wax ka maqan yihiin ama dheeraad yihiin

Imtixaanku waxa uu ka kooban yahay **5** qaybood:

| | | |
|---|---|---|
| QAYBTA KOOWAAD: | Akhris | 20 Dhibcood |
| QAYBTA LABAAD: | Maanso iyo Maahmaahyo | 40 Dhibcood |
| QAYBTA SADDEXAAD: | Hees hawleedyo | 10 Dhibcood |
| QAYBTA AFRAAD: | Naxwe | 10 Dhibcood |
| QAYBTA SHANAAD: | Curis | 20 Dhibcood |
| | **Wadarta Guud** | **100 DHIBCOOD** |

Ka jawaab dhammaan su'aalaha qaybta 1$^{aad}$ – 5$^{aad}$

Lama oggola Mobile iyo waraaqo kale

• www.somexams.com ✻ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

## QAYBTA KOOWAAD: SHEEKO

### War Weyn iyo Arag Weyd ah

**Akhri sheekadan kadib ka jawaab weydiimaha ka dambeeya**

Beri waxaa jiri jirey nin abbaanduule ah oo la odhan jirey Abshir. Waxa uu ahaa nin deegaankiisa ka caan ah, difaacana sharafta iyo magaca dadkiisa.

Waxa kale oo uu ahaa nin garab istaaga oo caawiya wixii dhibaato ah ee bulshada soo waajaha.

Waagii danbe Abshir bulshadiisu waa ay jeclaysteen waxqabadkiisa iyo kartidiisa, waxaanay go'aansadeen in ay hogaamiye u caleemo saaraan. Ninkan oo markii horaba ahaa abbaandulle karti badan oo dhaqan wanaagsan leh, markii uu bulshadiisa hogaamiye u noqdayna waxa uu ku darsaday talo wanaag, cadaalada iyo dulqaad.

Abbaandulihii bulshadiisii waxa uu ka dhigay bulsho barwaaqo iyo horumar ku nool. Muddo dhawr sanno ah markii uu Abshir hogaanka beeshiisa hayay waxa meel-walba gaadhay magaciisa iyo amaantiisa, geed kasta iyo gole kastana waa laysaga markhaati furey hogaamintiisa wanaagsan.

Ammaanta iyo maamul wanaaga Abshir waxaa maqley boqor ka mida boqoradii awooda badnaa ee ka talinayey deegaanadii ku dhawaa deegaanka uu Abshir ka taliyo.

Boqorka waxaa in badan ku soo noqnoqday magacii ninka iyo ammaantiisa isaga oo u quudhi la' ninka iyo ammaantiisa wanaagsan. Ayuu go'aan ku gaadhay in uu soo arko ninka iyo maamulkiisa.

Subaxii danbe boqorka oo muujinaya awooda iyo hodonimada uu leeyahay ayaa waxa uu soo kaxaystay ciidamo fardooley ah iyo awr ay ku rarantahay hanti farabadan.

Markii uu soo gaadhay deeggaankii uu Abshir ka talinayey ayaa waxa la tusay nin bar yar oo aan dhar qurux leh xidhnayn oo dadkiisa iskaga dhex jira. Markii uu hubsaday in ninkii uu doonayey ee magaca waynaa uu ninkan yahay ayaa isaga oo madaxa ruxaya yidhi "marna ismaan lahayn sidan ayuu u egyahay ninka magaciisu igu batay. Allaylehe waa War wayn iyo arag weyd ah".



© SLNECB, 2022

• www.somexams.com ✻ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

**Goobo gali jawaabta saxda ah.** **(20dhibcood)**

1. Abaandulaha waxa la odhan jriey
   - B. Abshir
   - T. Cali
   - J. Geele
   - x. Cumar

2. Abaanduluhu degaanka waxa uu ka ahaa
   - B. Nin xun
   - T. Caan ah
   - J. Hantiile
   - x. Beenaale

3. Wixii bulashada dhibaato soo waajaha waa uu ka
   - B. Caawin jirey
   - T. Cuni jirey
   - J. Dooni jirye
   - x. Dhici jirey

4. Waagii danbe Abshir bulshadu waa ay
   - B. Diidey
   - T. nacday
   - J. jeclaatay
   - x. dileen

5. Abaanduluhu waxaa uu difaaci jirey nafta iyo magaca
   - B. Carruurtiisa
   - T. Dalkiisa
   - J. Aabihii
   - x. Dadkiisa

6. Abshir bulshadiisa ayaa go'aansatey in ay u caleemo saaraan
   - B. hogaamiye
   - T. ugaas
   - J. suldaan
   - x. caaqil

7. Abbaanduulanimadii waxaa uu ku darsadey
   - B.tuugnimo
   - T. jaahilnimo
   - J. talo-wadnaag
   - x. cadaalad daro



© SLNECB, 2022

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

8. Bulshadu in ay barwaaqo ku noolaato waxaa ka dhigey
   B. Lacag
   T. Beero
   J. Madaxweyne
   x. Abaanduuleh

9. Waxaa meel walba gaadhey
   B. Murrankiisii
   T. Warrankiisii
   J. Ammaantiisii
   x. Ceebtiisii

10. Geed kasta iyo gole kasta waxaa lagu marag furey
   B. hogaamintiisa wanaagsan
   T. hogaamintiisa xun
   J. hogaamintiisa jilicsan
   x. hogaaminitiisa dabacsan

11. Hogaaminta iyo ammaanta Abshir waxaa maqlay
   B. Naagtiisa
   T. Boqor
   J. Suldaan
   x. Madaxweyne

12. Boqorka waxa uu ka mid ahaa boqaradii
   B. awooda badnaa
   T. awooda yaraa
   J. awooda xumaa
   x. awooda laheyn

13. Boqorka waxaa ku soo noqnoqday
   B. Buuqa Abshir
   T. Baahida Abshir
   J. Ammaanta Abshir
   x. Cayda Abshir

14. Boqorka waxaa uu ka talin jiry deeggaan u dhow deggaanka
   B. Soomaaliland
   T. Abshir
   J. Cali
   x. Cumar



© SLNECB, 2022

• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

15. Boqorku waxa uu quudhi waayey
    - B. Hantidiisa
    - T. Xoolihiisa
    - J. Quruxdiisa
    - x. Tilmaantiisa wanaagsan

16. Boqorkii waxa uu go'aan ku gaadhay in uu ninka iyo maamulkiisa
    - B. soo arko
    - T. soo burburiyo
    - J. soo kaxeeyo
    - x. soo abaabulo

17. Boqorku wax uu soo kaxaystey
    - B. Ciidamo fardooley ah
    - T. Awr ay ku rarantahay hanti badan
    - J. B iyo T
    - x. Midna

18. Awrta boqorka waxaa ku rarnaa
    - B. Hub
    - T. Qashin
    - J. Hanti badan
    - x. Buug

19. Sheekada magaceedu waa
    - B. Wan weyn iyo war liita
    - T. Wan waalan iyo war xun
    - J. War weyn iyo arag weyda
    - x. war weyn iyo weedh weyn

20. Boqorku wuxuu arkay
    - B. Nin bar yar
    - T. Nin badh yar
    - J. Nin xoog weyn
    - x. Nin bawdo yar



© SLNECB. 2022

• www.somexams.com ✻ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

**QAYBTA LABAAD: Maanso iyo Maahmaahyo** **(40 Dhibcood)**

1. b) Sheeg magaca abwaanka tiriyey gabayga Baroordiiq? (2 Dhibcood)

..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................

t) Waa maxay baroordiiq? (2 dhibcood)

..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................

j) Halkee ayuu ku dhashay gabayaagu? (2 Dhibcood)

..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................

x) Halkee ayuu gabayaagu degganaa marka uu gabayga baroordiiq tiriyey? (2 Dhibcood)

..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................

Kh) Gabayaaga maxaa ku kalifay inuu gabayga tiriyo? (2 Dhibcood)

..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................

2. b) Sheeg magaca abwaanka tiriyey gabayga Kibirka? (2 Dhibcood)

..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................

t) Sheeg sannadka uu abwaanku tiriyey gabayga? (2 Dhibcood)

..........................................................................................................................
..........................................................................................................................
..........................................................................................................................



© SLNECB, 2022

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

t) Muxuu gabayaagu uga jeeday tuducyadan soo socd:

i. kuligood addoomaha rabbow,qaybshey kibistiiye
bad kalluun ku jira kay tahay, ama fijaan kooban
nin waliba wixii loo katibay, waa la kulansiine (3 dhibcood)

.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................

ii. Cartan dhuurta kooraha markuu, kor ugu laabaayey
Garaad Faarax dhay iyo karuur, kala macaanaaye
Misna kala xadhaadhaa dhunkaal, kulankii goobeede
Ragow,kibirka waa lagu kufaa, kaa ha la ogaado (3 dhibcood)

.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................

3. b) Sheeg magaca abwaanka sameeyey heesta qabyaalada? (2 Dhibcood)

.................................................................................................................
.................................................................................................................

t) Halkee ayaa uu ku dhashay abwaanku? (2 Dhibcood)

.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................

j) Maxaa qofka ku kalifa in uu adeegsado qabyaalad? (2 Dhibcood)

.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................

x) Muxuu abwaanku ula jeedaa marka uu lahaa:

i. Uf qabiilka anaa leh.
Wuxuunbaa ku adeegta.
Nin iskii kartidiisa.
Isagoon cid ku tiirsan.
Isku taagi karaynin. (2 Dhibcood)

.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................



© SLNECB, 2022

• www.somexams.com ✻ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

ii. Wuxuunbaa ehel ii ah.
Dadka kaan af aqaano ee.
si wax iila arkaaya ee.
Na midayso ujeedo. (2 Dhibcood)

.................................................................................................
.................................................................................................
.................................................................................................
.................................................................................................

4. Sheeg Maahmaayahan hoos ku qoran ujeedada loo cuskado:

b) Hal Libaax arkaysaa, ma godlato (2 dhibcood)

.................................................................................................
.................................................................................................
.................................................................................................

t) Ama arinkeen ahaw ama aqbal keen ahaw (2 dhibcood)

.................................................................................................
.................................................................................................
.................................................................................................

j) Ammaano kugu raagtay, yaddaa baad mooddaa (2 dhibcood)

.................................................................................................
.................................................................................................
.................................................................................................

x) Hubsiimo halbaa la siistaa (2 dhibcood)

.................................................................................................
.................................................................................................
.................................................................................................

kh) Nin ku arkaya looma sare joogsado (2 dhibcood)

.................................................................................................
.................................................................................................
.................................................................................................



© SLNECB, 2022

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

**QAYBTA SADDEXAAD: Hees hawleedyo** **(10Dhibcood)**

1. Waa maxay hees-hawleed? (2 dhibcood)

.............................................................................................................................
.............................................................................................................................
.............................................................................................................................

2. Waa maxay farqiga u dhaxeeya hees-hawleedyada? (1 dhibic)

.............................................................................................................................
.............................................................................................................................
.............................................................................................................................

3. Maxaynu u adeegsanaa hees hawleedyada? (1 dhibic)

.............................................................................................................................
.............................................................................................................................
.............................................................................................................................

4. Hees-hawleedyadan soo socda yaa loogu heesaa:

i. Mayrac galabeed
Oo nin mayracay
Malmaleegiyo
Maalin uga roon. (2 dhibcood)

.............................................................................................................................
.............................................................................................................................

ii. Gaabeeya gaabeeyaay
Gaabyeeya guradaada
Gacantaydu gaadhaayoo
Gal xareeda laga helay. (2 dhibcood)

.............................................................................................................................
.............................................................................................................................

iii. Markaan aan manqaafyada iyo
Malaawidayda xidhanahay
Moohaarna buuxsado
Waxaan ahay mulkiilaha
Loo soo macaash tago. (2 dhibcood)

.............................................................................................................................
.............................................................................................................................



© SLNECB, 2022

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

## QAYBTA AFRAAD: NAXWE (10Dhibcood)

1.

b) Waa maxay fal? (2 Dhibcood)

.............................................................................................................
.............................................................................................................
.............................................................................................................
.............................................................................................................

t) Iabo ka sheeg qaybaha fal tagay? (2 Dhibcood)

.............................................................................................................
.............................................................................................................
.............................................................................................................
.............................................................................................................

j) Weedhahan soo socda u beddel faljooga iyo fal soo socda ?

i. Macalinkii waa uu yimid (2 dhibcood)
Faljooga: .......................................................................................
Falsoo socda: ..................................................................................

ii. Saafi waa ay safartay. (2 dhibcood)
Faljooga: .......................................................................................
Falsoo socda: ..................................................................................

iii. Geeddi gaadhi ayaa uu ka kaxeeyey. (2 dhibcood)
Faljooga: .......................................................................................
Falsoo socda: ..................................................................................

## QAYBTA SHANAAD: Curris (20 Dhibcood)

**Curris ka qor ugu yaraan 150 erey, adigoo mid ka dooranaya labadan mawduuc ee hoos ku qoran:**

**B. Qiimaha Diinta Islaamka.**
**T. Dhibaatada ay keento Abaartu.**

.............................................................................................................
.............................................................................................................
.............................................................................................................
.............................................................................................................
.............................................................................................................
.............................................................................................................



© SLNECB, 2022

• www.somexams.com ❋ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS

DHAMMAAD



© SLNECB, 2022

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com